# Gaari dhigashada, shuruucda wadada iyo adiga

**Gaari dhigashada iyo sharciga wada maridu waxay u jiraan in la xaqiijiyo isticmaalka wado amaana u marida wadooyinka Fiktooriya si qof walbaa uga faaiidaysto.**

## Masuuliyadaada.

Dareewal laysan haysta ahaan, waxaa lagaa filayaa inaad ogaato shuruucda wadada mar walbana aad raacdo. Inaad ku guuldaraysato ixtiraamida shuruucda wadada waxay kuu keenaysaa in lagu siiyo ganaaxa gaari dhigashada. Haddii ganaaxa aan la bixin, qiimaha sharciyeynta iyo talaabo sharci ah ayaa ka dhalan karta.

## Masuulka golaha degmada

Waxaa waajib nagu ah in:

- goobaha gaaridhigashada ay si xaq ah u wadaagaan dadweynuhu
- baabuurta iyo dadka lugta ahna aan la dhibin ama caqabadi ku imaan
- khatar kasta oo ay keentay si xun u dhigasho hoos ayaa loo dhigay

## Dhigashda muddo aad u dheer




Mudada gaari dhigashada waxaa lagu muujiyey goobta gaari dhigashada si loo ogolaado in dadka ugu badani ay u helli karaan goob ay dhigtaan.

Marka la adeegsanayo calamaada xakamaynta dhererka wadada ama goobta, waxaa waajib kugu ah in aadan iska dhigan halkaas wax ka badan mudada la ogol yahay.

Calaamadaan macneheedu waxa weeye 15 daqiiqo keliya laga bilaabo 8 subaxii ilaa 5 ta galabtii maalmaha dugsiga.


## Si sax ah u dhigashada gaariga

Waa inaad gaariga dhigtaa laymanka la calaamadiyey ee goobta gaari dhigashada. Dareewaladu isma taagi karaan wadada baaskiilka, wadada la wadaago, laymanka kala qaybiya, ama khad dabiici ah oo ku dhow dhererka wadada goob baabuurtu ku badan tahay, haddii aanay jirin calamaad la ogolaan karo.



**Lama istaagi karo** macneheedu waa **lama istaagi karo sinabal.** Taas macneheedu waa isma taagi karto xataa haddaad qof gaariga ka dejinayso, kumana xirna in aad gaariga kaga tagto matoorka oo daaran ama inaad gaariga ku jirto.


Ma jiraan goobo la istaago oo ay qeexi karaan calaamadaha jaallada ah kerb-ka (kerbku waa dhinaca dadka lugta ahi maraan).



**Waa dembi inaad gaari mid kale dhinac dhigto.**

Markaad dhigayso wado leh laba jaho waxaa waajiba inaad dhigto dhinaca bidixda ee wadada. Gaarigaagu waa inuu u jeedaa jahada aad ku socoto, taasi waa: dhinaca rakaabku waa in uu yaalla dhinaca aan gawaaridu marayn mana aha inuu xigo dhinaca isteerinku xigo, marka laga saaro wadada halka jaho ah.

**Meelaha baabuurto marto**





Dareewaladu maaha inay dhigtaan meesha wadada laga gooyo mar walbaba waa inay ogolaadaan meel la mari karo si loo maro ama looga baxo ama looga galo.

Dareewalada waxaa waajib ku ah in aanay dhigan meelaha la maro markay sugayaan inay qof qaadaan ama markay arday dejinayaan.

**Baarkinka la geli karo**




Goobta gaari dhigashada la geli karo waxaa isticmaali kara keliya qof leh ogolaanshaha gaari dhigashada iinta oo leh calaamada iinta ee isdulsaaran, ama dareewal gaariga dhiganaya si qofka iinta leh oo haysta ogolaanshaha iinta u soo galo. Ogolaanshuhu wuxuu shaqaynayaa keliya marka qofka iinta lihi ku safrayo gaariga.

Dareewalku waa inuu bixiyaa magaciisa/magaceeda iyo cinwaanka uuna dhiibaa laysanka marka uu sidaas weydiiyo askarigu ama sarkaalka gaari dhigashada.

## Tilmaamayaasha amaanka gaari dhigashada

Haddii aad dhigato wadada weyn ama yar oo yaalla dugsiga agagaarkiisa:

1. Ogolow waqti kugu filan oo aad ku geyso ilmahaaga dugsiga si amaana. Ka feker inaad dhigato meel xoogaa ka fog dugsiga oo aad xoogaa ugu soo socoto dugsiga.
2. La soco dhamaan calaamadaha xakamaynta taraafiga iyo jahooyinka dugsiga ee kormeerayaasha goynta wadada.
3. La qorshay ilmahaaga marka iyo meesha ugu aaminsan oo aad ka qaadi karto. Hel goobaha meeshay amaanka ah oo gaariga looga dego lagana gooyo wadada.
4. MARNA ha uga yeerin ilmahaaga wadada dhinaceeda kale. *Orod ku soo goynta wadada ee ilmahaaga aad ayay khatar ugu tahay ilmahaaga.*

✓ Waxaanu doonaynaa in aan xaqiijino amaanka ilmahayaga, kuwa kale ee lugaynaya iyo kuwa kale ee gawaarida ku socda ee wadooyinkayaga iyo dugsiga.

- ✓ Carruurta waa u sahlan tahay khatarta badanaana degdeg ayay go'aan ku gaaraan. Muhiim ayay u tahay dadka waaweyn inay ku hogaamiyaan tusaale ahaan una dhigaan dabeecada amaanka marka wadada la goynayo.
- ✓ Fadlan raac shuruucdaan amaanka ilmahaaga iyo kuwa la da'da ah iyo saaxiibada carruurtaada.
- ✓ Haddii qof walbaa raaco shuruucdaan, waxay u noqonaysaa amaan dhamaan carruurta dugsiga.